Waxaan isku daraynaa macluumaadka daryeelkaaga iyo caafimaadka si aan u kobcino adeegyada maxaliga ah ee aad hesho

Waa maxay faa"iidada kuugu jirta arintaan?

Xirfadlayaasha caafimaadka iyo daryeelka ee kashaqeenaaya daryeelkaaga waxa ay awoodi doonaan inay arkaan macluumaadkaaga si ay u gaaran go'aano isla markiiba oo leh badqab ku aadan daryeelkaaga

Waxaad haysataa Ikhtiyaar

Haddii aad ku faraxsantahay in macluumaadkaaga qayb kanoqdo diiwaanka daryeelka iyo caafimaadka guud, markaas waxna inaad sameyso looma baahna.

Hase yeeshee, haddii aadan rabin inuu macluumaadkaaga qayb kanoqdo, waa inaad falcelin sameysaa.

Haddii aad kabaxdid, macluumaadkaaga lalama wadaagaayo qaybna kama noqonaayo diiwaanka isku dhafka ah ee elektaroonig ah hase yeeshee waa lasii wadayaa in lala wadaago ururada sida hadaba lasameeyo, ayadoo la adeegsanaayo taleefan, iimayl iyo warqad.

Kahor inta aadan kabixin, fadlan iskuday inaad si taxadar leh u akhrido xaashidaan aadna fahanto muhiimada ay kuuleedahay.

Haddii aad doorato inaad kabaxdo, ma awoodi doontid inaad ka faa''iidaysatid gunooyinka aad helaysid diiwaanka isku dhafka ah ee elektarooniga ah. Xirfadlayaasha latacaalaya daryeelkaaga ma awoodaan inay helaan macluumaadkaaga oo buuxa iyo sidoon kale macluumaadkaaga ugu danbeeyay, sidaas oowgeed go'aanada kusaabsan daryeelkaaga waxay qaadan karaan waqti badan, xataa haddii ay xaalad degdeg ah jirto. Kabixitaanku waxa uu sidoo kale culays kukeenayaa xirfadlayaasha daryeelka bixiya si ay u sameeyaan qorshe iyo maareen ku aadan daryeelkaaga iyo ka warqabka caafimaadka.

Haddii aadan rabin la macluumaadkaga cidna lala wadaagin, waad nala socodsiin kartaa adoo soobuuxinaaya foomkaan aad kahelayso qaybta danbe ee xaashidaan noona soocelinaaya, ama adoo isticmaalaya foomka webseetkeena.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad qof kala hadasho dookhyada kusaabsan macluumaadkaaga, waxaad nagala sooxariir kartaa webseetkeena:**www.northlondonpartners.org.uk/joined-up-care-record**

Waxaan kaa codsanaynaa inaad si taxadar leh oga fakartid gaarista go'aanka sababtoo ah soobandhigida macluumaadkaga daryeelka bulshada iyo caafimaadka wuxuu fududeeninayaa in adeegyada la bixiyo lana helo daawada iyo daryeelka kugu habboon. Haddii aadan kabixin, waad badeli kartaa fikirkaaga waadna kusoo noqon kartaa waqti kasta.

Waxaan u baahanahay lambarkaaga NHS si aadan u fulino codsigaaga. Haddii aadan aqoon lambarkaaga NHS fadlan booqo: **https://www.england.nhs.uk/contact-us/how-can-we-help/ how-can-i-find-out-my-nhs-number/** ama shaqaalaha GP.

Waxaad sidoo kale heli kartaa foomka kabixitaanka adoo booqanaya webseetkeena:**www.northlondonpartners.org.uk/joined-up-care-record** Waxaad heli doontaa rasiitka xaqiijinta codsigaaga. Fadlan lana sooxariir haddii aad jeclaan lahayd inaad heshid ama aadanba helin.

Macluumaadkaygu mayahay qarsoodi?

Dhamaan xirfadlayaasha gacanta kuhaaya macluumaadkaaga caafimaadka iyo daryeelka waxay ku shaqeeyaan qawaaniin anshax oo adag micnaheeduna yahay inay ixtiraamaan asturnaanta xogtaada ayna sidoo kale ilaaliyaan dhamaan macluumaadkaaga qarsoodiga ah. Haddii aysan sidaas samayn waa xadgudub cad.

Macluumaadka adiga kugu saabsan waxaa lagu ilaalinayaa Data Protection Act (Xeerka Ilaalinta Xoga) 2018/Xeerarka Guud ee Ilaalinta Xogta 2016.

Tani waxay u baahan tahay daryeel bixiyaal caalami ah:

- Oo arki kara kaliya macluumaadka ay u baahan si ay ugu fuliyaan shaqadooda una maareeyaan bixinta daryeelka
- Oo ilaaliya diiwaanada daryeelka iyo caafimaadka
- Shaqadooda kuqaba kalsooni ku aadan macluumaadkaaga

Yaa awoodi doona inay arkaan macluumaadka diiwaanada isku dhafka ah?

Kaliya waxaa arki kara dadka u baahan inay fiiriyaan macluumaadkaaga si ay kuusiiyaan taageero caafimaad sidoo kale bulshada daryeel bixiyaasha ah waxay heli karaan macluumaadka qofka. Dadkaas waxaa kujiri kara GPs, shaqaalaha bulshada, dhaqaatiirta isbitaalka, xirfadlayaasha caafimaadka bulshada, shaqaalaha dhimirka maskaxda, xubnaha kale ee katirsan kooxda daryeelka caafimaadka. Qof kasta waxa uu awoodi doonaa inuu fiiriyo macluumaadka kusaabsan shaqadooda. Sidaas daraadeed, shaqaalaha daryeelka bulshada waxay arki karaan qaybaha kaladuwan ee diiwaanada isku dhafka ah ee ku aadan daaweynta, ama GP kaaga.

Ururada qaybta ka ah barnaamijkaan waxaa laga heli karaa webseetkeena ayagoo waqtiba waqtiga kadanbeeya sii badanaaya.

Dadka deegaanka ma awoodi doonaan inay arkaan macluumaadkaaga sababo laxariira barnaamijkaan, hase yeeshee haddii aad jeclaan lahayd inaad aragtid diiwaanadaada bixinta daryeelka iyo caafimaadka, waxaad si toos ah oga codsan kartaa ururada daryeelka iyo caafimaadka.

NORTH LONDON PARTNERS in health and care
North Central London's sustainability and transformation partnership

NHS

Haddii aad jaceshahay macluumaadkaan inaad kuhesho luuqad aan ahayn Ingiriis, fadlan booqo barta:

www.northlondonpartners.org.uk/joined-up-care-record

Barnaamijkaan waxaa isku soodubariday Iskaashatada Bartamaha Waqooyiga London ee kashaqeeya caafimaadka iyo daryeelka: waa iskaashi u taaqan kooxaha tabarucaada ee caafimaadka (CCGs), maamulka maxaliga ah ee waqooyiga iyo bartamaha London qaabilsana bixinta daryeelka caafimaadka sida (Barnet, Camden, Enfield, Haringey iyo Islington). **www.northlondonpartners.org.uk**

Halkee kaheli karaa macluumaad dheeraad ah?

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah lahadal adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka. Macluumaadka waxaa sidoo kale laga heli karaa webseetkeena:
www.northlondonpartners.org.uk/joined-up-care-record
waxaad sidoo kale kahelaysaa ogeysiiska qarsoodiga xogta

Macluumaadka kujira xaashidaan ayaa lasoo diyaariyay ayadoo taageero laga helaayo Healthwatch Barnet iyo Guddiga Bulshada Qaabilsan Daryeelka Dadka waawayn ee Barnet.

NLP3696_00222758_NLP xaashida macluumaadka AW.indd 1-4

Haddii aad jeclaan lahayd inaad kabaxdo, fadlan dhamaystir foomkaan noona sooceli

Haddii aad jeclaan lahayd inaad kabaxdo, fadlan dhamaystir foomkaan noona sooceli.

*Ma kashaqayn karno codsigaaga anagoon helin macluumaadkaan.

Fadlan kusoo dar macluumaadka lagaala sooxariiraayo si laguula soosocodsiiyo.

Jinsiga:_____

Magaca koowaad*: _____

Magaca aabaha*: _____

Taariikhda dhalashada*: _____

Lambarka NHS*: _____

Xaruunta GP ee aad ka diiwaan gashantahay: _____

Ciwaanka iimaylka: _____

Ciwaanka boostada*: _____

_____

Lambarka boostada:_____

Foomkaan ma waxaa dhamaystiraysaa adoo qof kale wakiil ka ah?

☐ Haa ☐ Maya

Haddii jawaabtu haa tahay, waa maxay laxariirka inka dhaxeeya qofkaan? _____

Fadlan caalmada tik saar sida ugu habboon; qofka aan u dhamaystiraayo foomkaan:

- ☐ waxa uu kayar yahay 16 waxaana ahay masuulkiisa sharciga/waxaana iga saaran masuuliyad waalid ahaan.
- ☐ awood uma lihi inaan bixiyo oggolaansho ama awood qareen oo ku aadan caafimaadka iyo daryeelka.

Fadlan calaamada tikta saar bokiska hoose:

- ☐ Waan akhriyay xaashida waaana fahmay cawaaqibka kabixitaanka

  Magacaaga oo saddexan:_____

Saxiixaaga: _____

Foomkaan waxaa si bilaash ah ugu soodiri kartaa, asagoo afka, kaxiran:

boostada bilaashka ah ee diiwaanka daryeelka isku dhafan ee nlp (lambarka boostada la iskama rabo)

Macluumaad sidee ah ayaa kujiri doona diiwaanada isku dhafka ah?

Inta badan macluumaadkaaga daryeelka iyo caafimaadka, sida daawada iyo xasaasiyada, warbixinta kooban ee daryeelkaaga ee uu diyaariyay isbitaalkii aad horey u joogtay iyo balamaha mustaqbalka ayaa lagu darayaa. Tani waxaa kujiri doona dhamaan xogtaada hadda ee lagu diiwaan galiyay nidaamyada elektarooniga ah ee adeegyada caafimaadka iyo daryeelka.

Waqti kabacdi, waxaa sidoo kale lagu darayaa macluumaadka ururada kale ee bixiya NHS iyo adeegyada bulshada deeegaanka ee maxaliga ah. Tani waxaa kujiri doona diiwaanada caafimaadka maskaxda iyo macluumaadka daryeelka bulshada, xaruumaha caafimaadka, farmashiga bulshada iyo qaybta mutadawacnimada.

Dhamaan diiwaanada caafimaadka dadka waawayn iyo caruurta waa la isku dari doonaa sidoo kale si lamid ah macluumaadka daryeelka dadka waawayn. Hada ha qorsheenayno inaan ku darno diiwaanada caruurta ee daryeelka bulshada.

Hase yeeshee, taas lama micno ahan in qayb kasta ee macluumaadka diiwaankaaga uu kamid yahay.

Tusaale macluumaadka xasaasiga ah ee laga reebi doono, waxaa kamid ah faahfaahinta imaanshaha goobaha caafimaadka ee ku aadan galmada, diiwaanada daaweynta dhalmada, diiwaanadii hore ee dadka helay shahaadada aqoonsiga jinsiga.

Macluumaadka kujira diiwaanada la isku dhafay waxaa loo isticmaali doonaa qaabab kaladuwan:

- Waxaa isticmaali doona shaqaalaha daryeelka iyo caafimaadka marka aad soo booqato, ama ay kusoo booqdaan
- Waxaa sidoo kale isticmaali doona kooxda daryeelka si ay u fahmaan caafimaadka dadka iyo daryeelka ay u baahan yihiin
- Waxaa loo isticmaali doonaa si loogu hubiyo daryeel leh tayo sare oo lasiiyo dadka degan dhamaan degmadeena kuwaas qaba caaafimaad daro baahday ama xaalado daryeel

Tusaalaha sida arintaan u shaqeen karto waxaad kaheli kartaa webseetkeena.
www.northlondonpartners.org.uk/joined-up-care-record

Waa maxay faa'iidada laga helo diiwaanada guud ee caafimaadka?

Inaad haysatid diiwaanada guud ee caafimaadka waxay lamicno tahay xirfadlayaashaada daryeelka caafimaadka ay arkaan macluumaadkaaga daryeelka iyo caafimaadka ayna gaari karaan go'aano isla markiiba ah oo badqab leh kuna saabsan kooxaha daryeelka deegaankaaga iyo daryeelka caafimaadka.

Haddii aad isticmaasho Adeegyada daryeelka iyo caafimaadka maxaliga ah waxaad helaysaa faa''iidooyin badan oo ku aadan haysashada diiwaanada isku dhafka ah:

- Qof kasta oo gacan kulahaa daryeelkaaga waxa uu arki doonaa dhamaan sawirka
- Marka meel kale aad daryeel ahaan u aadid ama aad la kulantid xirfadlayaal daryeel oo cusub, waxay heli doonaan macluumaadkaaga caafimaadka iyo daryeelka umana baaahna inay gadaal ugu noqdaan taariikhda caafimaadkaaga
- Natiijada baaritaanada caadiga ah sida (baaritaanada dhiiga) waxaa helaaya dhamaan qof kasta oo kashaqeenaaya daryeelkaaga, ayadoon lafiirineen meesha baaritaanka lagu sameeyay, si looga hortago in mar labaad laqaado
- Xirfadlayaasha caalamiga ah ee gacanta kuhaaya daryeelkaaga waxay awoodi doonaan inay fiiriyaan diiwaanka caafimaadkaaga iyo daryeelka si ay u qorsheeyaan kobcinta daryeelkaaga
- Xirfadlayaasha kasoo jeeda ururada kaladuwan waxay awoodi doonaan inay arkaan meesha ay kajirto fursad lagu kobcin karo daryeelka laguna hubin karo in adiga iyo dadka kale ee kula midka ah aad heshaan daryeelka ugu habboon ee ay bixiso kooxdu. Tusaale ahaan, haddii ay jirto fursad lagu hormarinaayo daryeelka sonkoroowga ee xaruunta GP kaaga.

Xirfadlayaasha daryeelka bulshada iyo caafimaadka:

- Waxay heli doonaan macluumaadka ugu danbeeyay si ay u qorsheeyaan una hormariyaan daryeelka dadka deegaankooda, una gaaran go'aano badan oo waxtar leh
- Waxaa waqti yar kuqaadanaya inay helaan macluumaadka ugu habboon ee ku saabsan ururada daryeelka caafimaadka iyo bulshada iyo nidaamka IT, waqtina kuma dhuminayaan inay helaan diiwaanada macluumaadka duubaana macluumaadka markasta
- Xirfadlayaasha daryeel bixiyaasha caafimaadka waxay u shaqeen karaan koox ahaan si ay u kobciyaan fursada, sida aragtida ah haddii ay u baahdaan yool saaris dheeraad ah oo ku aadan baarista caafimaadka jirka ee dadka naaafada ah

Tusaalaha sida arintaan u shaqeen karto waxaad kaheli kartaa webseetkeena.

Dadka deegaanka degan ahaan, waxaan daryeelka caafimaadka u aadnaa guud ahaan London

Dhamaanteeba waxaan adeegsanaa adeegyo caafimaadk iyo kuwa daryeel oo aan u isticmaalno nafteena, haddii ay ahaan lahayd inaan booqano GP, isbitaalka aan kahaysano balanta ama haddii booqasho uu noogu imaanaayo shaqaale bulsho. Dhamaan adeegyada daryeelkeena kama helno hal meel, kamana helno hal urur. Waxaa laga yabaa inaan aragno GP keena deegaanka, laakiin aan aadno isbitaal kuyaala degmo kale. Haddii aadan u baahanahay daryeel degdeg ah, waxaa laga yabaa in naloo qaado qaybta ugu habboon ee xaaladaha degdega ah iyo shilka, taas oo laga yaabo inay kafogtahay meesha aan

kunool nahay.

Marka arintaan dhacdo, urur kasta waxa uu kaydiyaa diiwaanka daryeelka uu nasiiyay; waqtiyadii hore, diiwaanadaas waxay kuqoran yihiin warqad, laakiin hadda badanaa waxaa lagu qoraa elektaroonig si gaar uu urur kasta u haysto.

Waxaan qorsheenaynaa inaan ku biirno diiwaanada caafimaadka iyo daryeelka ee elektaroonig ah oo loogu talagalay dhamaan caruurta iyo dadka waawayn ee Barnet, Camden, Enfield, Haringey iyo Islington (waqooyiga bartamaha London) si kuwa nasiinaaya daryeelka ay u fahmaan dhamaan baahideena ayna u gaaraan go'aanada ugu habboon ee ku aadan daryeelka aan haysano ama aan rabno.

Xirfadlayaasha iyo daryeel bixiyaasha caafimaadka waxay macluumaadka sanado badan nagula wadaagayeen warqad - hadda waxaan qorsheenaynaa inaan isticmaalno teknoolajiyada casriga ah.
Isku darka diiwaanada ee shantaas degmo waa qorshayaasha tusmada isku darka diiwaanada dhamaan gabi ahaanba London, laakiin ilaa tani dhacdo, diiwaanada isku dhafka ah ee caafimaadka waxay kaliya kuseeyaan shantaas degmo.

Xaashidaan waxay sharaxaysaa faa''iidada ay kuu leedahay arintaan shaqsi deegaanka kunool ahaan. Waxa ay sharaxaysaa:

- Faa''iidooyinka diiwaanka isku dhafka ah ee caafimaadka
- Nooca macluumaadka kujira diiwaanka isku dhafka ah ee caafimaadka
- Cida awoodi doonta inay arkaan macluumaadka diiwaanada isku dhafka ah ee caafimaadka
- Sida macluumaadkaaaga loo ilaalinaayo
- Ikhtiyaarkaaga ku aadan kabixida diiwaanka isku dhafka ah
- Sida looga baxo